

Tell Them From Me student survey

Ra'yi-baarista Ardayga ee Ayaga Igu Sheega

Frequently Asked Questions (parents and carers)

Su'aalaha badanaa la isweydiyo (waalidiinta iyo daryeelayaash)

Xarunta Tirakoobka Waxbarashada iyo Qiimeynta (CESE)

1. Waa maxay ra'yi-baarista ardayga ee Ayaga Igu Sheega (Tell Them From Me)?

Ra'yi-baarista Ardayga ee *Tell Them From Me* waxay waydiineysaa su'aalo ku saabsan qodobbo loo yaqaan inay saameeyaan waxqabadka aqooneed iyo natiijooyin kale. Ujeedada waa inay caawiso hagaajinta natiijooyinka barashada ardayda. Ra'yi-baarista waxaa loogu talagalay in lagu cabbiro, qiimeeyo loogana warbixiyo aragtida ardayga fikradaha ardayga ee dugsiga iyo heerarka nidaamka. Ujeedada laga leeyahay ra'yi-baarista NSW waxay ku salaysan tahay fayoobidda, howlgelinta ardayga, iyo waxqabadyada wax-baridda ee dhabta ah.

2. Su'aal nooc ah ayaa ra'yi-baaristu weydiin doontaa?

Su'aalaha ra'yi-baarista waxay la xiriiraan tallaabooyinka soo socda ee **dugsiyada hoose**:

Ka-qaybgalka cayaaraha iyo waxqabadyada dheeraadka ah ee manhajka ka-baxsan	Anshaxa dugsiga ka jira	Waqtiga barashada ee waxtarka leh
Isticmaalka ICT ee barashada	Habdhaqanka shaqada-guriga	Muhiimadda iyo xoojinta barida
Dareenka lahaanshaha	Danaha iyo dhiirigelinta	Adkaysiga
Xiriiri Habboon	Dadaalka	Waayo-aragnimada in laysku xoogsheegto
Qiimaynta natiijooyinka dugsiga	Xirfadaha iyo taxadiga waxbarasha	Uga-doodista dugsiga
Xiriirada baraha iyo ardayga ee habboon	Rajooyinka guusha	Cimilada barashada ee habboon

Su'aalaha ra'yi-baarista waxay la xiriiraan tallaabooyinka soo ee **dugsiyada sare**:

Ka-qaybgalka cayaaraha iyo waxqabadyada dheeraadka ah ee manhajka ka-baxsan	Habdhaqanka shaqada-guriga	Rajooyinka guusha
Xirfadaha iyo taxadiga waxbarasha	Isku-kalsoonida aqooneed	Anshaxa dugsiga ka jira
Waayo-aragnimada in laysku xoogsheegto	Googoyska	Dareenka lahaanshaha
Danaha iyo dhiirigelinta	Waqtiga barashada ee waxtarka leh	Rajooyinka: dhammaystirka Sannadka 12aad, Jaamacadda, TAFE
Xiriiri Habboon	Dadaalka	Muhiimadda iyo xoojinta barida
Ladnaanta	Qiimaynta natiijooyinka dugsiga	Cimilada barashada ee habboon
Adkaysiga aqooneed	Uga-doodista dugsiga	Uga-doodista wixii ka baxsan dugsiga
Xiriirada baraha iyo ardayga ee habboon	Isticmaalka ICT ee barashada	Adkaysiga

3. Sidee dugsiyada loo xushay inay ka qaybqaataan?

Ra'yi-baaristu waxay u furan tahay dhammaan dugsiyada dawladda NSW iyada oo aan wax kharash ah u lahayn. Dugsiga ilmahaaga ayaa go'aansaday inuu ka qaybqaato.



4. Sidee ayaa ilmahaygu uga faa'iideysanayaa ka-qayb qaadashada ra'yi-baarista?

Ra'yi-baarista Ardeyga ee *Tell Them From Me* waxay siin doontaa maamulayaasha dugsiga iyo hoggaamiyeyaasha dugsiga aragtida ku saabsan howlgelinta ardayga, ladnaanta iyo waxqabadka baridda waxtarka leh ee dugsiga ka jirta, marka laga eego dhanka ardayda.

Xogta laga soo ururiyey jawaabaha ra'yi-baarista ayaa si degdeg ah loogu soo ururiyey warbixinnada madaxda dugsiyada. Maamulayaashu waxay markaa isticmaali karaan macluumaadkan si ay uga caawiso inay ogaadaan arrimaha soo-baxaya ayna wax u qorsheeyaan horumarinta dugsiga.

5. Muxuu ilmahaygu u baahan yahay inuu sameeyo si uu uga qaybqaato ra'yi-baarista?

Ra'yi-baaristu waxay caadi ahaan qaadata wax ka yar 30 daqiiqo, waxaana lagu sameeyaa dhammaanteed online iyada oo loo marayo website amaan ah oo ay ka shaqeeyaan sameeyeyaasha ra'yi-baarista, *The Learning Bar*. Dugsiyadu waxay samayn doonaan kombiyuutaro ama laptops oo la heli karo si ardaydu u dhamaystiraan ra'yi-baarista inta lagu jiro saacadaha dugsiga.

6. Ilmahaygu ma inuu ka qeyb-qaataa?

Maya, ka-qaybgalka ra'yi-baarista waa ikhtiyaari. Imahaagu kama qayb qaadan doono haddii adiga ama ilmahaagu aydin rabin. Haddii, inta lagu jiro ra'yi-baarista, ilmahaagu uu dareemo raaxo la'aan, isagu/iyadu waxay dooran karaan inay joojiyaan ra'yi-baarista wakhti kasta. Su'aalaha badankood ee ra'yi-baarista ayaa laga boodi karaa. Waalidiinta/ardayda waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan helitaanka, iyo saxitaanka macluumaadka ardayga.

7. Miyuu dugsigu ogaan karaa ilmahayga jawaabahooda?

Shaqaalaha dugsiyada ma awoodi doonaan inay ardayda shakhsiyadooda ka aqoonsadaan jawaabahooda. Si loo hubiyo qarsoodnimada, ardayda ka qeybqaadata waxay heli doonaan magac ugaar ah iyo baasweeth. Markii wax ka yar shan arday ay ka jawaabaan su'aasha, natiijooyinka lama heli doono.

Tiro yar oo shaqaale ah oo ka tirsan Xarunta Tirakoobka iyo Qiimeynta Waxbarashada (Centre For Education Statistics and Evaluation (CESE)) ayaa heli doonta jawaabaha ardayda gaarka ah ayadoo ujeedadu tahay falanqaynta dowlad-goboleedka oo dhan ah.

Xogta ardayda ee gaarka ah waxaa lagu hayn doonaa server ammaan ah oo helitaankiisu si adag ugu xaddidan yahay cilmi baarayaasha CESE. Cilmi-baadhayaashu waxay xiisaynayaan kaliya isbeddellada – ee maaha jawaabaha ardayda ee gaarka ah Ardayna laguma aqoonsan doono wax daabacaaad ah. Ma jiro dugsiga la aqoonsan doono haddii aysan ogolaansho bixin.

8. Falanqayn noocee ah ayaa lagu sameyn doonaa xogta ra'yi-baarista?

Isla markii ra'yi-baarista la dhammeeyo, warbixinnada waa la diyaariyaa, kiisaska intooda badan waxaa heli kara dugsiyada saddex maalmood shaqo oo gudahood. Hoggaamiyeyaashu waxay u isticmaali karaan xogta si ay si fiican ugu fahmaan waayo-aragnimada iyo aragtida ardayda ee xagga dugsigooda.

CESE waxay qaban doontaa falanqaynta xogta ra'yi-baarista ayagoo la-kaashanaysa xogta ardayga ee jirta oo wasaaraddu hayso, oo ay ka mid tahay xogta waxqabadka.

Natiijooyinku waxay ka caawin doonaan dhammaan dugsiyada inay si fiican u fahmaan xiriirka ka dhexeeya fayoobidda, howlgelinta, barista wax-ku-oolka leh iyo barashada ardayda. Natiijooyinka ka soo baxa falanqaynta CESE ee xogtan ayaa sidoo kale ka caawin doonta bareyaasha iyo maamulayaasha inay ka wada hadlaan waxay yihiin shaqooyinka si loo horumariyo natiijooyinka ardayga. Tani waxay taageertaa diirad-saarista joogtada ah ee wasaaradda oo ku aadan tayada baridda iyo hoggaaminta. Xogta waa loo sii-hayn doonaa falanqaynta mustaqbalka si ay nooga caawiso inaan si fiican u fahanno dabeecada howlgelinta iyo fayoobidda ardayga ee wakhtiga jira.

9. Dhammaan ardayda dugsiga ma ka qaybqaadan karaan ra'yi-baarista?

Ra'yi-baarista dugsiga hoose- waxaa loogu talagalay ardayda ku jirta Sannadaha 4aad ilaa 6aad. Dugsiyada waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay u ogolaadaan arday badan intii suuragal ah ee kooxahan sanadkan inay ka qaybqaataan. Dugsiyada Sare waxaa lagu dhiirigelinayaa inay u ogolaadaan arday badan intii suuragal ah Sannadaha 7aad ilaa 12aad inay ka qaybqaataan.

10. Goorma ayuu bilaaban doonaa ra'yi-baarista *Tell Them From Me*?

Ra'yi-baarisyada waxaa lagu qaban doonaa dhammaan dugsiyada ka qeybgalaya dhammaadka Teeramaka 1aad iyo (ikhtiyaar) Teeramaka 3aad/4aad.



Waa maxay CESE?

Xarunta Tirakoobka iyo Qiimeynta Waxbarashada (CESE) waa qayb ka mid ah Wasaaradda Waxbarashada.

CESE waxaa loo sameeyay si loo wanaajiyo waxtarka, iyo masuuliyadda waxbarashada ee New South Wales. CESE waxay aqoonsan doontaa lana wadaagi doontaa wixii shaqooyin ah, ee abuurista fursado cusub oo lagu hagaajinayo baridda iyo barashada ee dhammaan waxbarashada oo dhan.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan CESE waxaa laga heli karaa: www.cese.nsw.gov.au

Waa maxay *The Learning Bar*?

The Learning Bar waxay ku takhasustay cilmi-baarista ku salaysan naqshadaynta iyo fududeynta qiimaynta ardayga iyo xalalka ra'yi-baarista ee ardayda dugsi hoose iyo sare labadaba. Kooxda cilmi-baarista gudaha oo uu hoggaaminayo Madaxweynaha, Dr J Douglas Willms, ayaa qaadaya mashaariic ballaaran oo loo adeegsado nidaamka dugsi si loo saameeyo siyaasadda qaranka. Waa wax ka soo horjeeda cilmi-baarista in ra'yi-baarista, *Tell Them From Me*, inay noqotay ra'yi-baarista dugsi qaraneed oo ugu weyn Canada, oo laga isticmaalo sagaal ka mid ah tobanka gobol ee Canada. Guud ahaan, in ka badan 6,300 oo dugsi iyo 5.4 milyan oo arday ayaa ka qaybqaatay ra'yi-baaristii la sameeyey laba iyo tobankii sano ee la soo dhaafay.

Dr Willms wuxuu dhawaan qabtay Guddoomiyaha Tier 1 Canada Research Chair ee Akhris-qoraalka iyo Horumarka Aadanaha. Wuxuu ka qaatay kaalin hogaamin xagga horumarinta su'aalaha Barnaamijka OECD ee Qiimaynta Ardayda Caalamiga ah (Programme for International Student Assessment – PISA).

Ujeedooyin maamul ahaaneed, *The Learning Bar* waxay sidoo kale heli doontaa helitaan ku-meel-gaar ah ee aqoonsiga jawaabaha ardayga ee laga aqoonsan karo su'aalaha ra'yi-baarista. Marka laga reebo *The Learning Bar* iyo cilmi-baarayaasha CESE ee wasaaradda, jawaabaha ardayga ee la aqoonsan karo looma sheegi doono qof ama hay'ad kale oo aan ahayn sida uu sharcigu u baahan yahay.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan *The Learning Bar* waxaa laga heli karaa: www.thelearningbar.com

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan ra'yi-baarista waalidka, fadlan kala xirii CESE adiga oo isticmaalaya email: TTFM@det.nsw.edu.au ama telefoon **1300 131 499**.